# XAFIISKA QARAMADA MIDOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Warbixin uu Danjire Nikolas Kay, Ergaygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Middobay u Qaabilsan Soomaaliaya u jeediyay Golaha Ammaanka.
22 May 2014

Mudane Madaxweyne,
Xubnaha Golaha Ammaanka,

Waxaan ka mahad-celinayaa fursadan aan warbixinta ku siinayo Golaha Ammaanka iyo taageerada joogtada ah ee midaysan ee aad siinaysaan Soomaaliya. Ergadda (xafiiska) Qaramada Midoobay u Qaabilsan Kaalmaynta Soomaaliya (UNSOM), waxaa u dhamaaneysa sanadkii koowaad, taas oo ku beegan 3da bisha Juun.

Muddo hadda laga-joogo hal sano, Dowladda Federaalka Soomaaliyeed waxay ka codsatay Qaramada Midoobay inay hesho "hal albaab" oo la garaaco, si uu albaab u xiriiriyo kaalmada caalamka, maadaama wadanka uu ka soo kabanaayo labaatameeyo sanno oo colaad ah.

Ayada oo arrintaas laga jawaabayo, Xafiiska UNSOM wuxuu joogitaankiisa ku baahiyey Soomaaliya oo dhan, Inkasta oo ay jirtay caqabado aad u wayn oo la- xiriirta amniga, hadana, waxaa sharaf ii ah in ay hay'adaha Qaramada Midoobay ay maanta ku leeyihiin dalka joogitaanka ugu ballaaran ee Soomaaliya, marka loo eego sida ay xaaladda ahayed mudadii la soo dhaafay ee 18 sanno ahayd. Rabitaanka Qaramada Midoobay ee ah inay la noolaato, kana barbar shaqeyso ummada Soomaaliyeed waa mid aad u adag. Qorshahanagu wuxuu yahay inaan iska sii ballaarino sida aan hadda nahay.

Shaqadanada waxay ku xirantahay in aan la yeelano xiriir addag oo wadda shaqeyn Dowladda Federaalka, Howlgalka Uururka Midowga Africa ee fadhigiisu yahay Soomaaliya (AMISOM), Urur Goboleedka IGAD, Midowga Yurub (EU) iyo wadamada deriska la ah Soomaaliya iyo jaalayaasha kale ee muhiimka ah (ee ay shaqadda naga wadda dhexayso). Xiriirka wadashaqeyn ee aan la leenahay AMISOM waa mid aad u adag. Hoggaanka labadanada ururna (xafiis) waxay Muqdisho kuleeyihiin saldhig aad u adag, marba- marka ka dambaysana ,waxaan isula howlgaleynaa si- isa-sootaraysa, si aan u gudanno waajibaadkaanaga shaqo.
Mudane Madaxwayne,

Waxaan ku faraxsanahay –inkasta oo uu jiro dib u dhac iyo waxyaabo aan lafilaynin,– hadana Soomaaliya waxay horumar ka samaysay dhinaca siyaasadda, dhaqaalaha, iyo arrimaha amniga toban iyo labaddii bilood ee la soo dhaafay.

Siyaaso ahaan, Dowlada Federaalka waxay bilaawday inay wax ka qabato qaar kamid ah arrimihii ugu weynaa ee lugu muransanaa una dhexeeyey Dowladda Dhexe iyo Gobollada. Waxay si firfircooni ku jirto ula howlgaleen Maamulka Kumeelgaarka ah ee Jubba, waxayna go'aansatay in ay taageerto xalka ah disidda maamul ka kooban seddax gobol, kuna yaalo koonfur Galbeed Soomaaliya. Dhinaca waqooyina, xiriirka u dhexeeyo Muqdisho iyo Puntland ayaa markale soo xoogeeysanaayo. Madaxda Soomaaliyeed way safraan, waxayna la howlgalaan Gobollada, waana arrin horumar leh unna baahan in la dhiirigeliyo, laakiin waxaan ka welwelsanahay degenaansho la'aanta siyaasadeed ee ka jirto Muqdisho, taas oo aan ka hadli doono marka aan u soo noqdo caqabadaha na horyaalo.

Dhaqaale ahaan, wadanku wuxuu si taxane ah u muujinayaa inuu jiro kororsiimo dhaqaale – inkastoo dhaqaalaha uu kasoo kacaayo meel aad u hooseeyso. Baarlamaanka wuxuu qaaday tallaabooyin lagu soo celinayo kalsoonidda deeqbixiyaasha. Waxaa la dhisay Guddi Maamula Arrimaha Maaliyadda, kana kooban Dowladda Federaalka, Bankiga Aduunka, IMF iyo wakiillo kaleba.

Waxaa kale oo guulo laga gaaray arrimaha amniga bilihii yeraa ee la soo dhaafay. Bishii April, markii aan joogay New York, ayaan ka wada hadalnay weerarka ay qaadayaan ciidamadda AMISOM--waa markii aan wadda hadalka la yeelanaynay AMISOM. Saaxiibkay oo hadana ah jaallahayga ah Danjire Annadif ayaa arrintan aad idinkaga warrami doono, (Laakiinse), waxaan jeclahay inaan boogaadin u diro dadkii Soomaaliyeed iyo saaxiibada ka socdo Ururka Midowga Afrika- kuwaas oo kuwaayey naftooda (howlgalkii) sannadii hore si nabad loogu helo Soomaaliya.

Dhowaan, Muqdisho waxaa ka jiray horumar dhinaca amniga ah. Istiraatijiyada cusub ee Xukuumadda iyo wadashaqeynta dhow ee lala yeeshay AMISOM ayaa waxay muujinayaan natiijooyin waxtar leh (wadanka gudihiisa). Inkasta oo ka hadalka arrintani ay weli dhimantahay, – sidoo kalana ay nagu Habooneen in aan niraahno waxaa dhamaaday falalki argagixisnimo. Dadka Soomaaliyeed ee rayidka ah ayaa ah kuwa ugu badan ee ku dhimanaayo- howlaha socdo. laakiinse Qaramada Midoobayna meesha lagama saari karo. Ciidamadii Ilaalinta Qaramadda Midoobay ayaa si rasmi ah dalka u yimid, luguna dhowaaqay imaatinkooda 18kii May, waxayna gacan naga siinayaan joogitaankeena iyo waxqabadkaanaguba.
Mudane Madaxweyne.

Aqoonsiga aan aqoonsaneyno horumarka laga sameeyey dhinaca siyaasadda, dhaqaalaha iyo amniga- waa in aanay naga indha tirin arrimaha gaabiska ah iyo caqabadaha waaweyn ee jira.
Ayada oo laraacayo hogaanka Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud, ayey xukuumada cusub ee Ra'iisulwasaare Cabdiweli Sheekh Axmed la timid dardar cusub.
Laakiinse horumarkiiu la rabay in laga sameeyo dhinca qaran dhiska uma socdo sidii degdega ahayd ee la filayay.

Markii aan idiin warramaayey bishii Maarso, waxaan idiin sheegay in Dowladda Federaalka Soomaaliyeed ay qarka u saarantahay inay soo gabagabeyso qorshihi dalka Soomaaliyeed looga hirgelin lahaa habka federaalka, sidoo kalena ay dib u eegis iyo dhaqan gelin ugu sameyn-laheyd Dastuurka, looguna diyaar garoobi lahaa doorasho sannadka 2016. Nasiib darro, qorshahan muhiimka ah, iyo waqtigii la hirgelin lahaa iyo arrimihii lugu garan lahaa hirgelintiisa, weli wey dhimanyihiin.

Arrinta mudnaanta koowaad leh waxay tahay sidii lugu sameyn lahaa maamul goboleedyo kumeel gaar ah oo loo wada-dhanyahay, waana talaabaddii oogu horaysay ee lagu samaynlahaa dowladd goboleedyo ku dhisan nidaamaka Federaalka, waxaana loo baahanyahay in la soo gabagabeeyo arrintan sanadkaan.

Horumarka laga sameeyey taabagelinta Heshiiskii Addis Ababa, ee lugu asaasay Maamulka Kumeelgaarka Jubba, ayaa u baahan in la dedejiyo. Waxaan soo dhoweyneynaa kaalinta muhiimka leh ee IGAD ka cayaarayso arrintan.

(In la helo) boolis, gar-soor iyo ciidamo asluub ah,– ayaa muhiim u ah sidii lagu heli lahaa xasilooni waarta iyo nabad, sidoo kaleetana, waxaa muhiim ah dib u dhaqan celinta iyo iskudhafidda maleeshiyooyinka ka towbad keenay dagaalka – waxaana arrintan lagu heli karaa in qorshe howleed loogu talo galo dhalinyaradda. Sidoo kale, waa inaan xaqiijinaa kuwa la eedeeyey, kadibna lagu helay inay dembi galeen - dembigaas oo laxiriira Al-shabaabnimo- in ay ka qeyb qaadan- karaan qorsheyaasha aan soo sheegnay, si loo xakameeyo afkaarta iyo dhaqanka xagjirnimada ku salaysan.

# XAFIISKA QARAMADA MIDOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Xad-gudubyada loo geysto haweenka Soomaaliyeed ayaa si aan la- ogolaan karin u sareeya. Khubaro Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha xadgudubka haweenka ayaa booqday Soomaaliya bishii December sannadkii hore. Waxaan ku howlan-nahay sidii aan ku hirgelin lahayn talo soo jeedintoodii muhiimka aheyd, annaga oo la kaashaneyno Dowladda, AMISOM iyo saxiibada kale ee kasocdo beesha caalamka. Xafiiska UNSOM ayaa si dhow ula shaqaynayo Dowladda Federaalka iyo AMISOM si loo bixiyo tababarro ku saabsan xuquuqul

aadanaha, sharciga caalamiga ee xaaladda dagaalka iyo sharciga la xiriiro arrimaha qoxootiga iyo badbaadinta caruurta. Weli lama samaynin Gudiga Qaabilsanaa Arrimaha Xuquuqul Insaanka.

Mudane Madaxwayne,

Waxaan safarro ku tegay meelo badan oo Soomaaliya katirsan sannadkii la soo dhaafay, waxaana aad usoo dhegeystay baahida iyo rajada ay qabaan dadka Soomaaliyeed. Warka aadka u dheer ee sida cad la ii soo gaarsiiyay wuxuu yahay, “dadka Soomaaliyeed waxay doonayaan in ay arkaan wadankoodi oo xasilooni iyo midnimo kajirto”. Waxaa kale oo ay rabaan dadka inay arkaan Dowladda Federaalka iyo Bulshada Caalamka oo si dhakhso leh horumar u sameeynayo.

Sannadka 2014 waa sannad aad muhiim ugu ah Soomaaliya. Waqtigana aad ayuu u yaryahay . Anniga rajo weyn oo adag ayaan qabaa, laakiin waxaa cad in loo baahanyahay in Dowladda iyo saaxiibadeeda caalamka in ay sameeyaan horumar deg-deg leh.

Mudane Madaxweyne,

Waxaan dareemayaa in Soomaaliya ay hadda gelayso xaalad adag-marka arrinta laga eego dhinacyo fara badan: Siyaasad ahaan, waxaa jira baahi degdeg ah oo loo qabo in horumar laga sameeyo dib u eegista iyo hirgelinta Dastuurka, sidoo kalena, lugu kormeero habkii dhismaha Dowlad Goboleedyadda, kadibna loogu diyaar garoobi lahaa doorasho 2016. Waxaa kale ee aan ka walaacsanahay buuqa siyaasadeed ee hadda kajira Muqdisho, Waxaa jira xubno ka tirsan Baarlamaanka, tiradooduna ka badantahay boqol, ayaa oogu baaqaya Madaxweynaha in uu is casilo, Arrintan waxaa laga dheehan karaa in dib loogu noqon karo wareeg kale oo ismarin-waa ah. Iyo- in ay wada shaqayn la’aan ka dhexdhalato hay’adaha Dowliga ah ee Soomaaliyeed. Arrimahan oo kalena waa kuwii cuuryaamiyey Dowladihii dalka kajiray ilaa iyo sannadkii 2000. Soomaaliya waxay u baahantahay in hogaankeeda siyaasadeed uu ahaado mid taxane ah, xasilloon horayna arrimaha uwado. Dadkuna rajo aad u weyn ayey ka qabaan arintan-waa sii socoshada hogaanka. Wayna dhararayaan sidii lugu heli lahaa arrimahan aan soo sheegnay. Si loo xaliyo arrintan, waxaan kala shaqeeyey bulshada caalamka, sidoo kalena waxaan kala shaqayndoonaa Madaxwaynaha, Raiisul Wasaaraha, Wasiiradda, iyo Guddomiyaha Baarlamaanka.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta Aleem Siddique
Tel: +254 41 350 6603 • Email: unsom-spokesperson@un.org

Dhamaantooduna waxay ku midaysanyihiin sidii xal lagu heli lahaa arrimaha. Soomaaliya ma kari karto dib u dhac dambe oo ku yimaada habkeeda dowlad dhisidda. Hay'adaha dowliga ah ee (Soomaaliyeed) waa in ay isla shaqeeyaan, una howlgalaan sida ku cad Dastuurka ayagoo gudanayo mas'uuliyadda uu Dastuurku siinaayo hayad walbo si loo gaaro waxa ay dadku rabaan ama ay filayaan.

(Waxaa kale oo loo baahanyahay) in horumar degdeg ah laga sameeyo arrimaha amniga iyo xasilinta ku aadan dhulkii dhowaan la xureeyey. (Goob walbana), waxay u baahantahay in laga dhiso maamul dadku ogolyihiin. Dadkuna waana in uu arko faa'iidada kujirta arrintaas. Si loola xiriiro dadka, waa in amaanka goobaha hadda la xureeyay ee ay Al-shabab dhibka kawaddaan - si deg-deg ah loo sugaa amaankooda. Sanduuqa Qaramada Midoobay u qaabilsan Nabad-dhisidda wuxuu qoondeeyey 10 milyan oo doolar si loogu taageero dadaalka Dowladda

ku aadan nabad ka taabagelinta goobaha Al-shabaab laga xureeyey. iyo qeybaha kale ee kamidka ah koonfur-galbeed Soomaaliya. Weysmada ay AMISOM weysantahay diyaarado helikobtaro ah- ayaa ayaduna caqabad ah. Sidoo kale, waxaa caqabad ah hadii aan Sanduuqa lugu Gargaarayo Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed aan lacag kale lagu soo shubin, ma suurto geleyso in taageero muuqato ee saad ah loo fidiyo Ciidamada. Sidoo kale, waxaa mudnaanta koowaad leh istiraatiijiyadda lugu dhisi lahaa ciidamo Soomaaliyeed oo xirfadleyaal ah, farsamoyaqaano ah oo la hanan karo. Ilaa iyo hadda, in kasta oo Bulshada Caalamku ay muujisay dadaal badan oo la taaban karo, hadana, horumarku waa mid kala qeybsan oo aan ahayn sidii la rabay. Hadii aan wax laga qaban arrimahaan, waxaa imaan karta khatar ku aadan adkeyn b la'aanta guulihii ciidan ee la gaaray, sidoo kalane ay dib u soo noqoto amni la'aantii.

Hadii aan la sameynin horumar dhinaca dhaqaalaha, waxaa khatar gelaaya sumcada Bulshada Caalamka iyo tan Dowladda Federaalka. Dadka Soomaaliyeed waa inay arkaan/helaan faa'iidada ku jirto Qorshaha Hiigsiga Soomaaliyeed. Sanduuqa Gargaarka ee Qaramada Midoobay ee ay ka qeyb qaadanayaan wadamo badan- ayaa hadda shaqeynaayo, waxaana hadda la sameeyey hab si tartiib-tartiiah ah lacag loogu soo saarayo, Waxaana loo baahanyahay in lacag badan lugu shubo Sanduuqaas, Sidoo kalena, ay lacagi ka soo baxdo isla sanduuqaas. Waana in la sameeyaa hab-kale oo farsamo oo caalami ah oo lagu taageeraayo Soomaaliya.

Mudane Madaxwayne,

(Sidoo kalena) xaaladda beni'aadanimada ayaa kudhow in ay gasho heer khatar ah. Philippe Lazarini oo ah Ku-xigeenkayga sidoo kalane ah Isku-xiraha Arrimaha Bani'aadanimada ayaa dhowaan sheegay sida ay isugu dhowyihiin xaaladaha bani'aadanimo ee murugada leh ee maanta jirta iyo tii jirtay sannadii 2011. Waxaa jiro khatar keeni karto in dhibaatada hadda jirto ay sii xumaato, waxayna arrimahan ka dhalan karaan, xasilooni la'aanta hadda jirta, roob yarida, iyo gaaritaanka aadka u liito ee aan la gaari karin magaalooyinka qaarkood, taas oo ay sabab u tahay farsamada Al-shabaab ay ku xanibeyso wadooyinkii dadkaas waxlugu gaarsiin lahaa. Dhibaatada lacageed ee ku aadan arrimaha bani'aadanimada ayaa iyaduna sii xumeynayso xaaladda. Ilaa iyo hadda, sannadan, dalabka wadajirka ah (ee dhaqaale ee dhammaan hay'adaha Qaramada Midoobay oo ah US$ 933 malyan) ayaa waxaa laga helay boqolkiiba 19% oo kaliya. Halkaasina waxaa ka jira farqi gaaraya US $756 malyan), lacagtanna waxaa waxloogu qaban lahaa baahida ay qabaan dad gaarayo ilaa iyo 3 milyan oo qof. Xaaladda deeq bixineed ayaa aad u liidato, hay'adaha bani'aadanimo qaarkood ayaa ka fakaraaya inay xiraan howlihii ay wadeen ee lugu bad-baadinaayey beni'aadamka. Tusaale ahaan, UNICEF barnaamijkii daryeelka caafimaadka oo ay ku gargaareysay dad gaaraayo 3 malyan oo qof ayaa ku dhow inuu xirmo. US$ 60 milyan ayaa hadda si deg-deg ah loogu baahanyahay si loo joogteeyo qorshayaasha lugu badbaadinaayo arrimaha bani'aadanimada ee 2-3 bilood ee soo socoto. (Dhinaca kale,) maadaama aanan ogeyn xaaladda ee cuntada sida ay noqon doonto, arrinta hadda ka jirto Soomaaliya ma ahan mid caadi ah. Hadii la ogolaado in xaaladda bani'aadanimo ee Soomaaliya ay dib u dhacdo, (dalku wuxuu gelayaa) xaalad deg-deg ah- emergency. Arrimahana waxay wax u dhimayaan horumarkii laga sameeyey dhinaca dhaqaalaha, siyaasadda iyo horumarka.

Mudane Madaxweyne,

Mudada u dhexeyso warbixinta aan hadda bixinaayo iyo tan kale ee ku xigta, ayaa noqon doonto muddo ay kala baxayaan arrimaha Soomaaliya. Waxaan ku kalsoonahay in madaxda Soomaaliyeed iyo hay'adahooda dowliga ahba ay xallin doonaan caqabadaha hadda jira. Sidoo kalane ay Bulshada Caalamku sii wadi doonto , ayna aad u horumarin doonto taageerada ay hadda bixiso. Laakin, waa in aanan indhaha ka qabsan khatarta jirta.

Waxaan ku faraxsanahay dadaalka wadajirka ah ee ay sameeyeen saaxiibada Soomaaliya, sida IGAD, Ururka Midowga Afrika, Ururka Midowga

Yurub, Jaamacada Carabta iyo Qaramada Midoobay. Dhammaan hay'adahani khatar ayey u galeen sidii ay u fulin lahaayeen howlohooda. Waxaan boogaadinayaa kuwa naftooda ku waayey dadaalka aan sheegaayo. Waxaan aragnay 2 sarkaal oo u shaqaynayay Xafiiska Qaramada Middobay u Qaablisan Arrimaha Daroogooyinka iyo Dunuubta oo si xun loo dilay bishii Abriil. Nabad sameyntu qiimo ayey ku kacaysaa. Sida dhamaanteen aan wada ogsoon-nahay, guuldaradu ma ahan arrin aan wada kari karno qaadashadeeda. Waxaan ka mahad celinayaa taageerada aan leex-leexadka lahayn ee Golaha Amaanku u fidinaayo Soomaaliya iyo Go'aankiisa ku aadan in uu soo booqdo Soomaaliya sannadan aakhirkiisa.

Waad mahad santihiin.